Helping Hand™ *Health Education for Patients and Families*

# Baaritaanka Hawo-mareenka (Bronchoscopy) iyo Baaritaanka Cod soosaaraha (Laryngoscopy)

## Bronchoscopy and Laryngoscopy (Somali)

Baaritaanka hawo-mareenka (bronchoscopy) (bruh-**kaa**-skuh-pee) iyo baaritaanka sanduuqa codka (laryngoscopy) (leh-ruhn-**gaa**-skuh-pee) waa 2 baaritaan oo inta badan iskumar la sameeyo. Teloskoob gaar ah ayaa loo isticmaalaa si loo arko sanduuqa codka (larynx) iyo dhuumaha dabaysha (trachea iyo bronchi).

Waxa laga yaabaa in ilmahaagu u baahdo in tan la sameeyo iyada oo qayb ka ah baaritaanka dhibaatada neefsashada, daawayn ahaan, si uu u soo qaado qaybo yaryar oo unugyo ah si loo baaro (biopsy), ama in laga saaro shay xanniban.

**Ballanta Ilmahaaga**

Magaca ilmaha: ____________________ Taariikhda:__________ Waqtiga:__________

Fadlan ilmahaaga keen:

- ☐ Goobta Qaliinka Bukaan socodka Laga Diwaangaliyo, Dabaqa 1aad, 670 Children's Drive
- ☐ Dabaqa Guriga Xafiisyada ee Bukaanada Laga Diwaangeliyo, Dabaqa 1aad, 700 Children's Drive


©2015, Waxaa dib loo eegay 2024, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

## Ka Hor Hawsha

- Kalkaalisada ayaa kusoo wici doonta si ay su'aalo kaaga waydiiso caafimaadka cunugaaga.
- Kalkaalisada waxay kuu sheegi doontaa xiliga ay tahay inaad cunugaaga ka joojiso cuntada iyo cabitaanada, marka aad isbitaalka keeneyso iyo waqtiga qaliinka.
- Ha cunin xanjo, daawooyinka qufaca, iyo nacnaca adag. Haddii cunugaagu uu soo calaashaday xanjo, waxaa qaliinka dib loo dhigi doonaa 2 saacadood laga bilaabo wakhtiga uu xanjada tufay. Haddii la liqay xanjada, qaliinka waxaa dib loo dhigi doonaa 6 saacadood laga bilaabo xiligii uu xanjada laqay.

## Suuxinta Guud (General Anesthesia)

Ilmahaaga wuxuu heli doona suuxdin inta lagu guda jiro qaliinka. Waa nooc ka mid ah dawooyinka ka caawisa inay seexdaan oo ka ilaalisa inay dareemaan xanuun. Waxaa sida caadiga ah laga siiyaa xididdada dhiigga (IV) ama waxaa lagaga neefsadaa maaskaro.

- Dhakhtarka ama daryeel bixiyaha ayaa kaala hadli doona daawooyinka la isticmaali doono.
- Nooca daawada ilmahaagu qaadan doono waxay ku xiran tahay sababta ay qaliinka u gelayaan iyo inta ay qaadanayso.

## Ka dib Qalliinka


Ilmahaaga waxaa la geynayaa qeybta daryeelka suuxdinta kaddib (PACU) ama qolka bogsashada. Waxaa la geynayaa qolalkooda markay soo toosaan. Dhakhtarka ama daryeel bixiyaha ayaa kaala hadli doona sida uu qaliinku u dhacay. Waxaa laga yaabaa inay ku tusaan sawiro laga qaaday baaritaanka.

- Markii uu ilmuhu soo tooso, wuxuu cabbi karaa cabitaan yar oo dareere ah haddii aysan lablabaysneyn ama aysan huqaaceyn. Waxaa ka mid ah biyo, casiir tufaax ah, ama Popsicles®.
- Waxay u baahan yihiin inay cabbaan biyo badan 24 saacadood. Dhakhtarka ama bixiyaha daryeelka caafimaadka wuxuu kuu sheegi doonaa marka ay qaadan karaan cunto adag.
- Waxaa laga yaabaa inay ka daal badan yihiin sidii caadiga ahayd. Tani waa caadi.
- Codka ilmahaagu wuxuu noqon karaa mid gaabis ah, waxaana laga yaabaa inay qabaan cune xanuun. Waxaa laga yaabaa in loo siiyo acetaminophen (Tylenol®) xanuunka.

- Qandho yar waa caadi. Cunugaagu ha cabbo cabitaano badan si ay kaaga caawiyaan hoos u dhigida ama ka hortagga qandhada.

## Daawada Xanuunka Kadib Qalliinka

Dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadku wuxuu kugula talin karaa acetaminophen (Tylenol®, Feverall®, iyo Tempra®) ama ibuprofen (Motrin®, Advil®)




**Sawirka 2** Isticmaal qalabka cabbiraadda carruurta marka aad siinayso dawo dareere ah.

- Sii tirada saxda ah ee daawada sida uu kugu amray dhaqtarkaaga.
- Haddii daawadu tahay dareere, isticmaal aalada wax lagu cabbiro si'aad u cabirto qiyaasta (Sawirka 2 aad). Waxaad qalabkaan ka heli kartaa farmashiyaha. **Qaaddada jikada ha ku cabbirin dawooyinka dareeraha ah.**
- La joog ilmahaaga illaa inta uu daawada oo dhan ka liqo.
- Haddii ilmahaagu qabo xanuun daran oo aan ka ba'ayn, wac dhakhtarkooda ama bixiyaha xanaanada caafimaadka. **Ha siin daawo dheeraad ah.**
- Ha siin wax ka badan 5 kuuro oo daawo ah muddo 24 saac gudaheed ah illaa uu dhaqtarka cunuga uu sidaas kugu amro mooyee.
- Ku keydi dhamaan daawooyinka meel aysan gaari karin carruurta ama rabaayada.
- Haddii ilmahaaga loo qoro dawooyinka xanuunka ama antibiyootiga, u isticmaal sida lagu faray.

Haddii canugaaga ama qof kale qaato daawooyin badan, marka ugu horeeysaa ka wac Xarunta Dhexe ee Sunta ee Ohio **1 (800) 222-1222 [TDD (614) 228-2272]**. Waxay kuu sheegi doonaan waxa ay tahay inaad sameyso.

## Goorta ay tahay in la Waco Dhakhtarka

Wac dhakhtarka cunugaaga ama daryeel bixiyahaaga caafimaadka haddi ay:

- Bilaabaan inay si ka duwan sidii caadiga ahayd u neefsadaan.
- Midabka maqaarku isbedelo.
- Aad uga daal badan yihiin sidii caadiga ahayd.
- Hayso qandho ka badan 101˚ Fahrenheit (F) ama 38.3˚ Celsius (C).

- Hayso qandho soconaysa in ka badan 24 saacadood ka dib baaritaanka.
- Hayso lallabo ama matag wax ka badan 24 saacadood ka dib baaritaanka. Ama in ka badan 12 saacadood haddii ay ka yar yihiin da'da 1 sano.
- Leeyihiin xabeeb ka sii daraysa 1 ama 2 maalmood ka dib.

## Goorta la wacayo 911

Usoo wac 911 wixii caawin degdeg ah haddii canugaaga leeyahay:

- Neefsashada oo adkaata, neefsashada oo qeylo leh, ama neefsashada oo hak-hakata.
- Dhiig ka yimaada afka ama qufaca dhiig.
- Bishimaha, wejiga ama gacmaha oo midab buluug ah yeesha.